



## Barnaamijka saaxiibadu wuxuu caawiyaa macallimiinta ku hadla labada luqadood

Iyada oo ay jirto yaraanta dhanka macallimiinta habka waxbarid ee labada luqadood, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay shaqaale ka qoranayaan dhexdeeda si ay u tababaraan koox macallimiin ah oo loogu talagalay boosaska dalabkoodu badan yahay.

“Tani si wanaagsan ayay iigu shaqeysay aniga,” ayuu sheegay Kedin Zapeta, oo isqoray Barnaamijka Saaxiibada Macallimiinta Labada Luqadood Ku Hadla. “Waxaan horey u haystay fikrad ah waxa waxbaridu noqon doontu maxaa yeelay waxaan soo ahaa kaaliye dhanka waxbarashada ah, sidaa darteed noqoshada qayb ka mid barnaamijka saaxiibadu wuxuu ahaa mid wanaagsan.”

Ka dib qalin jabintiisii isaga oo haysta shahaadada cilmiga bulshada, Zapeta wuxuu isaga oo kaaliye dhanka waxbarashada ah boos ka soo qabtay Dugsiga Hoose ee Lent. Markii uu ogaaday barnaamijka saaxiibada, wuu codsaday waana la aqbalay.

Yaraanta dhanka macallinka labada luqadood ku hadla waa arrin ku baahsan degaanka iyo sidoo kale PPS. Si loo xalliyo yaraanta dhanka macallinka labada luqadood ku hadla ee tobonaanka ka badan, PPS waxay bilowday barnaamijka saaxiibada. Waxay bixisaa jid kale oo bedel ah oo loogu talagalay shaqaalaha caadiga ah isla markaana aan wakiilka lahayn ee PPS iyo sidoo kale xubnaha ka tirsan bulshada, si ay u raadsadaan qalan jabinta shahaado dhanka waxbarashada ah si ay boos uga helaan PPS. Saaxiibadu waxay sidoo kale ruqsadda waxbarida oo hordhac ah ka helaan Guddiga Nidaamyada iyo Waxqabadka Macallinka.

Si ay ugu qalmaan barnaamijka, musharaxiintu waxay u baahin yihiin in ay haystaan shahaado jaamacadeed waana in ay awoodaan in ay muujiyaan aqoon sare oo ay u leeyihiin Ingiriiska iyo luqadda lammaanaha ah. Degmadu waxay leedahay barnaamijka habka waxbarid ee labada luqadood oo ah Isbaanish, Mandarin, Af-Ruushka, Vietnamese iyo Japanese, iyada oo barnaamijku leeyahay saaxiibo ku hadla Af-Soomaaliga iyo Carabiga. Barnaamijku wuxuu qaataa qiyaastii laba ilaa saddex sano si loo dhammeysto. Waqtigan la joogo hadda waxaa jira 43 saaxiib oo barnaamijka ka tirsan.

Zapeta wuxuu qorsheynayaa in uu barnaamijka saaxiibada dhammeysto 2019, isaga oo rajeynaya in uu sii joogo Lent. “Waan jeclahay dugsigan iyo bulshadan, waxaan jeclaan lahaa in aan halkan sii joogo,” ayuu sheegay.

Inkasta oo PPS ay aqbashay codsiyada kooxda saaxiibada xigta ee bisha Janaayo, degmadu waxay sii wadaysaa in ay raadiso musharixiin wanaagsan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri [website-ka barnaamijka](#).

-Pamela Jordan